

CHARITY  
COMMISSION

# SI AMMAAN LEH U-TAAGEER SUURIYA

**Sii wax hay'daha samofalka sajjilan ee waayo-aragnimada u  
leh ka-hawlgalka jiidaha halista ah ee aan degganyn**

Wixii macluumaad dheeraad ah booqo websaydkayaga  
[www.charitycommission.gov.uk/7772](http://www.charitycommission.gov.uk/7772)

# Talo ku aaddan si ammaan ah wax u siinta Suuriya

Waxa jira baahiyo run ah oo ba'an ee gargaar aadaminimo loogu caawiyo dadka ay saamaysay colaadda Suuriya. Waxaan rabnaa inay dadku sii-wadaan deeqsi u bixita, oo kalsooni ka dareemaan ogaanshaha in deeqdoodu u tagayso kuwa aad u baahan. Markaad u dhiibto hay'adaha samofalka ah ee sajiilan ee leh waayo-aragnimada hawlwadista jiidaha laista ah ee aan degganyn, waxaad haysataa kalsooni in deeqdaada sidii habboonayd loo isticmaalayo.

Waxaan ognahay nasiib-darro inay jiraan kuwo si xun u adeegsada magaca iyo shaqada samofalka oo maaliyadda si musuqmaasu ah ugu wareejiya ujeedooyin denbi-fal ah. Waa kuwan tallabooyinka aad qaadi karto si aad u xaqiijiso in lacagtaadu a tagayso meesha saxa ah:

- Intaanad bixinin, hubi in hay'adda samofalka ay ka sajiilan tahay Golaha Samofalka oo uu magaca samofalka iyo/ama lambarka sajiilaaddu ku yaallo Sajiilaadda Samofalada ee [www.charitycommission.gov.uk](http://www.charitycommission.gov.uk) (click on 'Find charities').
- Ururiyaasha runta ah ee samofalku waa inay xirtaan astaan aqoonsi, awoodaan inay tusaan liisan dawlad hoose ama booliis, inay wataan weel dahaadhan oo ay awoodi karaan inay tusi karaan iany haystaan ruqsadda lacag ururinta.
- Ka taxadir naxwaha liita iyo qoraalada qaldan, oo y ku jiraan baqshadaha ama kiishashka dharku.
- Iskajir markaad ka jawaabayso iimaylada ama aad gujinayso laxiriirankooda. Ha "gujin-iskuxir" ka socda iimaylo shaki leh. Haddii aad rabto inaad onlayn wax ku bixiso, ka qor cinwaanka websaydka somofalka ee bogaaga.
- Haddii aad welwel ka qabto sharci ahaanta codsiga deeqda, ha ka waaban inaad toos ula xiriirto samofalka. Ka shaki wixii andacood ah marka aan faahfaahin la bixin karin. Waxaad ka heli kartaa faahfaahinta dhabta ah ee samofalka websaydkooda ama Sajiilaadda Samofalada, oo laga helo websaydka Golaha Samofalka.
- Haddii aad ka welwel qabto in ay tuugo ku bartilmaameedsaday, waa inaad u sheegto Action Fraud oo aad wacdo 0300 123 2040 ama booqato [www.actionfraud.police.uk](http://www.actionfraud.police.uk)